VERMONT
DEPARTMENT OF HEALTH

# Hagitaanada Kulaylinta Biyaha ee loogu talo galay Goobaha Cunnada

Marka Ogeysiis Kulaylinta Biyaha ah (mararka qaar loo yaqaan Talo Bixinta Kulaylinta Biyaha ama Amarka Biyo Kulaylinta) lasoo saaro, dhammaan biyaha lacabi karo ee lagu isticmaalo goobtaada cunno waa ay saamaynaysaa; cabidda, diyaarinta cunnada, dhaqista gacmaha, saxan dhaqista, iyo nadiifinta iyo wasakh ka dilista oogooyinka iyo qalabka cunnadu taabato.

Raac qaababkan ku meel gaadhka ah ee Ogeysiinaha Kulaylinta Biyaha lasoo saaro. Kooxda maamulka ayaa ka masuul ah inay xaqiijiso in qaababkani la isticmaalo si loo ilaaliyo caafimaadka dadweynaha. Haddii aanad xaqiijin karin badqabka cunnada adigoo raacaya qaababkan, **islamarkaba jooji hawlgalada cunnada.** Fadlan ogsoonow inay jiri doonaan xaalado gaar ah oo ay tahay inaad samayso qaabab dheeri ah ama kumeel gaar ah oo ka baxsan inta halkan ku xusan.

## Ilaha Kale ee Laga Heli Karo Biyo Ammaan ah

Waxa aad u isticmaali kartaa biyaha ka imaada ilaha soo socda ee ammaanka ah cabbitaanka, diyaarinta cunnada, dhaqista gacmaha:

- Kulaylinta biyaha - biyaha si wacan u karkara ugu yaraan hal daqiiqo dabadeetana la qaboojiyo kahor inta aan la isticmaalin.
- Biyaha caagadaha ku jira.
- Biyaha lagasoo qaado wakaalad biyo oo la ansixiyay ee ku jira weel daboolan oo heerka cunnada ah kaasoo ah nadiif wasakhdana laga dilay.
- Biyaha la cabi karo ee raaca habraaca Waaxda Ilaalinta Deegaanka.

Ha isticmaalin biyaha qasabada ama biyaha ka imanaya qalabka iyaga oo soo dhexmaraya shaandho. Shaandhooyinku ma reebaan dhammaan wasakhda, sidaasi awgeed badqabka cunnada lama xaqiijin karo.

## Howlaha Cunnada

- Cunnada baakada ku jirta wali waa la isticmaali karaa.
- Dhalaali cunnada ku barafawday tallaajadda ama iyadoo qayb ka ah qaabka waxkarinta. Ha isticmaalin biyaha qasabadda.

### Qalabka

- Ka dhalaali barafka baraf sameeyaha joojina samaynta barafka. Isticmaal barafka iibka ah ama barafka ka samaysan biyo ka imanaya il kale oo ammaan ah.
- Jooji isticmaalka mashiinada isku qaka, auto-fill coffee makers, qaybiyayaasha biyaha kulul, qaybiyayaasha casiirka iyo shaaha.

### Diyaarinta Cunnada Ubaahan Biyaha

- Diyaari kaliya cunnada adigoo isticmaalaya biyo laga helay il kale oo ammaan ah.

- Tuur cunnada diyaarka u ah in lacuno ee lagu sameeyay ama ay soo gaadheen biyo aan la cabi karin.
- Tuur cunnooyinka RTE-ga ah ee leh barafka ka samaysmay biyaha aan la cabi karin.

### Dhaqista ama Qoynta Cunnada Fresh-ka ah

- Isticmaal cunnada hore loo dhaqay loona baakad gareeyay ama khudaarta la qaboojiyay ama la qassaacadeeyay.
- Dhex gali cunnada biyo il kale oo ammaan ah ka yimi ama ku jira waasko nadiif ah oo wasakhda laga dilay.
- Ku dhaq cunnada fresh-ta ah biyo laga helay il kale oo ammaan ah.



## Habraacyada Gacmo Dhaqa

Haddii aanad raaci karin habraacyadan kale ee gacmo dhaqa, markaasi waa inaad joojiso diyaarinta cunnada. Kaliya cunnada baakada ku jirta wali waa la isticmaali karaa.

- U isticmaal biyo laga helay il kale oo ammaan ah gacmo dhaqidda. Tani waa lagu talo bixinayaa.
- Haddii il kale oo biyo ammaan ah laga helaa aanay jirin, gacmaha waxaa lagu dhaqan karaa biyaha qasabada iyo saabuunta. Waa inaad si buuxda u qallajisaa gacmahaaga adgoo isticmaalaya shukumaanka warqadda ah, deetana isticmaal gacmo nadiifiye.

Si toos ah gacmahaaga ha ugu taabanin cunnada RTE-ga. Dul gali gacmahaaga waxyaabaha sida waraaqaha la tuuro marka la isticmaalo, galoofyo iyo weel.



## Habraacyada Nadiifinta

### Nadiifinta iyo Ka Dilista Wasakhda Maacuunta iyo Weelka Cunnada Lagu Cuno

- Isticmaalka maacuunta halka mar la isticmaalo iyo weelasha wax lagu cuno ayaa lagu talo bixinayaa.
- Waxa aad isticmaali kartaa mashiinka dhaqidda weelka ee otomaatigga ah kadib marka aad xaqiijiso inuu si fiican ushaqaynayo si uu ugaadho heerkul biyood oo nadiifinaya maacuunta iyo weelka wax lagu cuno, uuna isticmaalayo agabka nadiifinta ee ku habboon.

### Nadiifinta Xarunta

- Jooji hawlgalada haddii nadaafada xaruntu ay khattar galin karto cunnada badqabkeeda.
- Waxa aad isticmaali kartaa biyaha aan la cabi karin si aad ugu nadiifiso sagxadda una nadiifiso oogooyinka kale ee aanay cunnadu taabanin.



## Ku Laabashada Hawlgalladii Caadiga ahaa

Raac tilmaamahan si aad ugu laabato hawlagalladii caadiga ahaa kadib marka la joojiyo Ogeysiiska Kulaylinta Biyaha:

- Hubi in agabka nadiifinta iyo dilista wasakhda sida mashiinka dhaqidda weelka, three-bay sinks, baaldiyadu, iwm inay yihiin nadiif wasakhdana laga dilay.
- Biyo ku nadiifi tuunbooyinka iyo qasabadaha. Raac tilmaamaha ka imanaya wakaaladaada biyaha ama biyaha qasabada ee qabow fur ugu yaraan shan daqiiqo.
- Biyee, nadiifi oo wasakhda ka dil qalabka biyaha ku xidhan (sida mashiinka isku qaska casiirka, spray misters, mashiinka shaaha ama coffee-ga, mashiinka barafka, dhaqayaasha koobabka galaaska ah, saxan dhaqaha, iyo qalabka kale ee biyuhu ku xidhan yihiin) adigoo raacaya tilmaamaha soo saaraha.
- Nadiifi oo wasakhda ka dil oogooyinka cunnada taabanaya, maacuunta, iyo qalabka kale ka hor inta aanad isticmaalin.
- Mari biyo dabciyayaasha (water softeners) wareegga dib usoo kabashada.
- Baddal shaandhooyinka ku jira qalabka sida water chillers-ka ama mashiinka barafka.